




Australian Government
Inspector-General of Taxation
Taxation Ombudsman

Cabashada Canshuurta?



Somali

Kumaan nahay

Kormeeraha Guud iyo Ombudsman-ka Canshuuraha (Inspector-General & Taxation Ombudsman (IGTO)) waa hay'ad madax-bannaan oo Federaal ah oo mas'uul ka ah inay kaa caawiso cabashooyinkaaga ku saabsan Xafiiska Cashuuraha ee Australia (Australian Taxation Office (ATO)) iyo hawlaha waxqabadyada maamuleed ee Boodhka Khubarada Canshuuraha (Tax Practitioners Board (TPB)).



1300 44 88 29

(qiimaha wicitaanka degaanka)

Sidee baan kuu caawin karnaa

Waxaan bixinnaa adeegga takhasuslaha Cashuuraha oo madax-bannaan, lacag la'aan ah, si uu kaaga caawiyo inaad wax ka qabato cabashooyinkaaga.

'Waxqabadka Maamuleed' waa erey ballaaran oo guud ahaan daboolaya caddaalada iyo macquulnimada xiriirka ama isdhexgalka ATO ama TPB ay kula leeyihiin.

Tusaale ahaan halka IGTO kaa caawin karto, waxaa ka mid ah aanse ku e'kayn:

- wakhtiga ka jawaab-celinta codsiyadaada qaadanayo;
- dhaqanka saraakiisha ATO ama TPB;
- helitaanka adeegyada online-ka ah;
- hubsashada ama ku-fillaanta sharaxaadda falalka ay qabato ATO ama TPB;



- xaqiijinta falalka ATO ama TPB inay raacaan siyaasadahooda iyo habraacyadooda; iyo
- xaqiijinta macaamilada ATO ama TPB kula leeyihiin inay yihiin qaab caddaalad iyo hufan ah isla markaana tixgelinaya dhammaan macluumaadka khuseeya oo la bixiyey, oo ay ka mid yihiin hantidhowrada iyo baaritaannada.

Haddii aadan hubin bal inaan ku caawin karno, fadlan nala soo xiriir.

Haddii aanan awoodin inaan si toos ah kuu caawino, waxaanu sameyn doonaa sida ugu fiican inaan ku siino talooyinka ku saabsaan wakaaladda ama haya'dda ugu haboon oo ku caawin karta.



GPO Box 551, Sydney NSW 2001

Habraaca cabashooyinka

Si aad ugu soo gudbiso cabashadaada xafiiskayaga, ka eeg qaybta “Sida Naloola soo Xiriiro” (How to contact us).

Kadib markaad cabasho soo gudbiso, sarkaalka baadhaha IGTO ayaa kula soo xiriiri doona 2 maalmood-shaqo gudahood si uu u ogolaado oo uuna kaala hadlo cabashadaada.

Waxaan si toos ah kuu caawin doonaa si aan wax uga qabano cabashadaada haddii ay macquul tahay.

Waxaan ubaahan karnaa inaan kaa helno macluumaad dheeraad ah adiga, ATO ama TPB si aanu si fiican ugu fahamno cabashadaada iyo inaan caddayno sidaan kuu caawin karno.

Waxaanu kula socodsiin doonaa wixii ku saabsan horumarkayaga waxaana ku siin doonaa qaab-wakhtiyeedka baaritaankayaga inta lagu jiro habraaca.

Sida naloola soo xiriiro



www.igt.gov.au



1300 44 88 29

(qiimaha wicitaanka degaanka)



GPO Box 551

Sydney NSW 2001

Haddii aad doonayso inaad cabasho ku soo gudbiso luqad aan Ingiriis ahayn, ka wac Adeegga Turjumidda Qoraalka iyo Tarjumida (Translating and Interpreting Service (TIS)) taleefanka **131 450**.

Haddii aad qabto laxaad la'aanta maqalka ama hadalka aadna heli karto qalabka teletypewriter oo haboon (TTY) ama qalab casri ah, taleefan u dir **13 36 77**.

Haddii aadan haysanin TTY ama qalab casri ah, ka wac Adeega Hadalka ilaa Hadalka (Speech to Speech Relay Service) taleefanka **1300 555 727**.